# BUUGA WAALIDIINTA DADKA BARTA LUUQADA INGIRIISKA

TITLE III

**Houston Independent School District**
**Barnaamijka Afafka-badan**

## HOUSTON INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT

HATTIE MAE WHITE EDUCATIONAL SUPPORT CENTER
4400 W 18th STREET, HOUSTON, TEXAS 77092


### GUDIDA WAXBARASHADA

**Harvin C. Moore**., Gudooomiye

**Paula M. Harris**, Gudoomiye ku-xigeenka kowaad

**Natasha M. Kamrani**, Gudoomiye ku-xigeenka labaad

**Carol Mims Galloway**, Xoghayn

**Lawrence Marshall**, Kaaliyaha Xoghaynta

**Diana Dávila**

**Dianne Johnson**

**Greg Meyers**

**Manuel Rodríguez Jr**

**KORMEERAHA DUGSIYADA**
Abelardo Saavedra, Ph.D.

### Kormeerayaasha Gobollada

**Thelma Garza,** Bariga HISD
**Cynthia Wilson,** Waqooyi HISD
**Warner Ervin,** Koonfur HISD
**Scott Van Beck,** Galbeed HISD
**Adriana Tamez,** BadhtamahaHISD
**Deborah Singleton,** Oolteernatif iskuul (Alternative Schools)


Siyaasada dugsiyada dhistariga ee gaarka ah ee Houston waxay xaraantinimaysay in qof lagu takooro da'diisa, midabkiisa, curyaanimo ama iin kale, asalkiisa, wadanka uu ka soo jeedo, xaasnimadiisa, qoomiyadiisa, jinsigiisa, ama fikirkiisa siyaasiga ah ama kiisa dhaqan ka ah.

© 2007-08 Houston Independent School District

## TUSMO (TABLE OF CONTENTS)


| | Page |
|---|---|
| **SHARCIYADA** | |
| Waxbarashada Dawliga ah (Dugsiga Hoose iyo Sare) | 1 |
| Is-qorista iyo Sharciga | 1-2 |
| Aaga aad u Aadayso Waxbarasho iyo Doorashada | 2 |
| | |
| **BARNAAMIJYADA DUGSIGA** | |
| Magnet Iskuul (Magnet Schools ) | 3 |
| Waxbarasho Sare | 3-4 |
| Dugsiyo Jaartarka ah ee HISD (HISD Charter Schools) | 4 |
| Barnaamiyadda Ardayda Luuqada Ingiriisku ku adag | 4 |
| Dugsiyadda Xagaaga (Summer Schools) | 5 |
| Waxbarashada Tiknoolijadda Mihnadda | 6 |
| | |
| **WARBIXINTA ISKUULADDA** | |
| Gadiidka | 6 |
| Shuruudaha Is-qorista | 7 |
| Sacaadaha Dugsiga | 7 |
| Qureec iyo Qaddo | 7 |
| Booqashadda Dugsiyadda | 8 |
| Warbixinta Qiimaynta/Tijaabadda | 8-9 |
| Miqiyaaska Dalacsiinta | 10 |
| Shuruudaha Qalin-fulinta (Qalin-jebinta) | 10 |
| Warbixinta Dugsiga | 10 |
| Kaadhka Warbixinta iyo derejooinka | 11 |
| | |
| **WARBIXINTA WAALIDKA** | |
| Shirka Waalidka-Macalimiinta | 12 |
| Abuurid Dhaqan Wax-Akhris oo Midho dhal leh | 12 |
| Cayminta Ardayda iyo Adeega Waxbarashadda | 13- |
| Ku-lug-lahaanshaha Waalidka | 14- |
| Mutadawiciin | 16 |
| Xalinta Mashaakilka | 16 |
| Macluumaadka Kulliyadda | 17 |
| | |
| **CAAFIMAAD,SHARCI IYO MA-HURAAN KALE** | |
| Arrimaha  Badbaadsanaanta iyo Caafimaadka | 18 |
| Addeegyada Caafimadka | 19 |
| Sharciga iyo adeegyada kale | 20- |

# MUHAAJIR: OGOW XAQA AAD LEEDAHAY IYO IKHTIYAARKAAGA

## SHARCIYADDA

### Waxbarashada Dawliga (Dugsiyadda Hoose iyo Sare)

Ku hay caruurtaada iskuulka. Waxaad xaq u leedahay in caruurtaadu wax ka barato dugsiyada dawliga ah. Maxakamadda sare ee maraykanka ayaa xukuntay laga soo bilaabo kiiskii dhexmaray *Plyler iyo Doe* in caruurta oo dhan ay xaq u leeyihiin iney dugsi aadan ama waxbarasho helaan iyadda oo aan loo eegan sharcinimadda muhaajirnimadooda. Hay'adda socdaalka ayaa balan-qaaday ineysan xidhayn dadka jooga iskuulka, Meelaha wax lagu caabudo, cisbitaalada ama xeryaha lagu daryeelo dumarka waxyeeladu soo gaadho.

Dugsiyaddu uma diidi karaan caruurta bilaa hoyga ah ama kuwa aan ciwaan lahayn iney ku soo biiraan dugsiga. Haddiiba aad dhib kala kulanto inaad ilmahaaga qorto dugsiyada distriga gaarka ah ee Houston (Houston Independent School District) oo loo soo gaabasado **HISD** sababaha kor ku xusan awgood waxaad soo wacdaa tilifoonkan si aad garab u hesho 713-556-6961

### Is-qorista iyo Sharciyadda

Haddii uu ilmuhu ku nool yahay xuduuda HISD da'diisuna u dhaxayso 5 jir ilaa 21 isla markaana uusan ka soo bixin dugsi sare waa loo ogol yahay inuu ku biiro dugsiyada HISD.Caruurta saddex jirka ah waxaa laga yaabaa iney helaan Adeeg Waxbarasho oo Gaar ah (Special Eduction Service)

Sharciyan si uu bilaabo ulo ama fasalka kowaad, ilmuhu waa inuu yahay lix jir 1-da Sibtambar ee sanad-dugsiyeedkaa. Inkastoo ayna ahayn sharci gobolka u yaal in ilmuhu galo kindargaardhan (Kindergarten) hadana waxay u fiican tahay ilmaha inuu ulo noqdo sidaa darteed waxaan ku dhiirigelinaynaa waalidiinta inay caruurtooda ku daraan kindargaardhan. Si loogu daro kindargaardhan waa in ilmuhu noqdaa Shan jir 1-da sibtambar ee sanad-dugsiyeedkaa la rabo in la qoro kindargaardhanka.

Qaar badan oo ka mid ah dugisyadda HISD ayaa waxay bixiyaan kindargaardhan gelin ama maalinle ah oo loogu talo galay seddex jiradda ama afar jiradda. Si aad ugu biirto barnaamijkan, waa in ilmuhu yahay ugu yaraan saddex-jir 1-da sibtambar ee sanad-dugsiyeedkaa sidoo kale waa inuu ka soo jeedaa reer danyar ah, ama uu yahay hoy-laawe amabase ay ku adag tahay ku hadalka luuqada ingiriiska. Waxaa inta badan la doorbidaa afar-jiradda buuxiya shuruudaha. Faafaahinta kala xidhiidh, kala xidhiidh xafiiska Eerli jaylhuudh (Office of Early Childhood) oo tilifoonkoodu yahay 713-556-6882.Waxaa jira barnaamijyo khaas ah loogu talo-galay caruurta curyaaminta ah ilaa marka ay dhashaan wixii faahfaahin ah ee arrinta ku lug leh kala xidhiidh Dhibaartment of isbayshal idhikayshan (Department of Special Education) oo tilifoonkoodu yahay 713-556-7025 ama la xidhiidh xafiiska gobolka.

Dugsi kastaa wuxuu uga baahan yahay ardayga aqoonsi shuruud u ah diwaangelintiisa iskuulka. Aqoonsigan waa inuu ka muuqdaa magaciisa rasmiga ee ugu qoran shahaadadiisa dhalashada ama ay qoraal kale oo maxkamadeed. Waalidka ama cidda kale ee ka masuulka ah ilmuhu waa iney ku keenaan muddo 30 maalmood ah gudahood (ama 90 maalmood hadii uu ilmuhu ku dhashay waddan kale oo aan ahayn U.S) dhokumentiga aqoonsiga ardayga, da'diisa, halka uu degan yahay iyo nuqul ka mid ah rikoodhka ardayga. Haddii ardaygu uusan lahayn sooshiyal sikuyuuriti nambar (Social Security number), dugisyada HISD ayaa siinaysa lambar kale oo la yidhaa idhikayshan infoormayshan maanayjmant sistam (Education Information Management System - PEIMS). **Ardayna looma diido karo in la qoro iskuulka iyaddoo sabab looga dhigayo inuu soo buuxin waayey dhokumentiyaddii looga baahnaa.**

Hasa ahaatee is-qoristu waa ku-meel gaadh waana la laalayaa qabashada dokumentiyada la rabo iyo cadaynta sharciyadda.

Marka waalid ama masuul kale oo la degan dad ay qaraabo yihiin ama saxiibo yihiin oo ku nool agagaarka HISD uu damco inuu ilmihiisa ku daro dugsi HISD ah waa inuu soo gudbiyaa cadayn deganaasho. Waalidka ama masuulka kale waa inuu soo dhamaystiraa cadaynta iskuulka ugu dhow isla markaana uu keena (1) Sawir (2) waraaq ka socota qofka uu la nool yahay ee leh ciwaanka uu soo gudbiyey isagoo waraaqda ku cadaynaya mudada uu ku noolaa halkaa (3) magaca iskuulkii ugu dambeeyay ee uu ilmuhu dhigan jiray (4) koobi ah biilkii biyaha, laydhka, ama gaasta ee qofka degan ciwaanka uu soo gudbiyey (5) Haddii uu kiro yahay guriga soo gudbisay ciwaankiisa waa inaad so gudbisaa heshiiska kiradda ee ansaxa ah oo uu ka muuqda magaca rasmiga ah ee qofka degan.Faahfaahinta soo wac xafiiska Bedelka Ardayda 713-556-6734.

Si aad u qorto ilmahaaga iskuulka la kaalay waraaqda dhalashada ilmaha ama cadayn kale oo ah da'diisa, ciwaanka halka aad degan tahay (buug wadista ama biilka biyaha, laydhk, iwm) iyo waraaqda talaalka ee u dambaysay oo uu saxeexay dhakhtar. Waxaa dhici karta in si ku meelgaadh ah loo sii qoro canuga haddii aad keento cadayn ah in la talaali doono ilmaha dhawaan. Wixii faahfaahin ee ku aadan talaalka la xidhiidh hay'adda caafimaadka 713-349-7423.

Haddii ilmahaagu uu ka soo wareego iskuul dhistariga ah oo uu yimaad iskuul kale oo HISD ah waxaa lagaaga baahan doono waraaqda talaalka iyo taraanskiribka uu kala yimid iskuulkiisaa hore.

**Aaga aad u aadayso waxbarasho iyo doorashada iskuulka**

Dugsi kastaa wuxuu ka hawl galaa aag ama soone taas oo ah inta uu iskuulku u adeego. HISD ayaa u dirta ardayda dugisiga hoose, dhexe ama sare ee uu ugu dhow iyaga oo eegaya ciwaanka gurigiisa. Si aad u ogaato dugsiga kuugu dhow soo wac xafiiska Bedelka Ardayda (Student Transfer) oo lagala hadli karo 713-556-6734 ama xafiiska wararka ee 713-556-6005.

Si loo siiyo doorasho badan oo aan lagu soo koobin meel keliya ayaa HISD waxay waalidka u ogoshahay iney ilmahooda u diraan karaan dugsi aan ahayn kan u dhow lakin taasi waxay ku xidhan tahay haddii iskuulka loo bedelayaa uu meel u hayo arday hor leh oo u soo wareegta oo ka timaad meel ka baxsan aaga uu u adeego. Marka iskuul aqbalo

arday ka timid meel ka baxsan aaga uu u adeego, HISD waxay u baahan tahay in waalidku ku hayo ilmaha iskuulka uu doortay sanad-dugsiyeedka oo dhan waalidkuna waa inuu dusha u ritaa masuuliyada gaadiidka ee ardayga. Sidoo kale waalidku wuu codsan karaa iskuul ah kuwa adeegyada gaarka ah bixiya sida Isbayshal Idhikayshan (Special Eduction), Magnat (Magnet), Majoorati-tu-maynoorati (Majority-to-Minority), isbays afaylabal (Space Available), Istaytat ADA (State ADA), Bablik Idhikayshan garaant (Puplic Eduction Grant), Idhikayshanal koontaraakting borogaraam (Educational Contracting Program).

Faahfaahinta ku aadan meelo ka banaan iskuulkada kale, habka codsiga iyo sharcinimada bedelka fadlan la soo hadal tilifoonka xafiiska Bedelka Ardayda oo ah 713-556-6734.

## BARNAAMIJYADA DUGSIGA

### Magned iskuul (Magnet Schools)

Dugsigyada Dhistariga ee gaarka ah ee Houston si ay u wax uga qabtaan baahiyaha kala duwan ee ardayda Houston waxay fuliyaan barnaamijyo kala duwan oo ay ka wadaan dugsiyada. Barnaamijka la yidhaa Magned Iskuul wuxuu ardayda u saamaxayaa iney qabtaan waxyaabaha ay xiiseeyaan ama ay horumariyaan waxyaabaha ay hibadda u leeyihiin marka laga yimaad waxbarashada caadiga ah. Barnaamijkan Magned waxaa culayska la saaraa meelo muhiim ah sida: Aart-ka, xisaabta, sayniska, tiknoolijiyada, Montessori, afafka-qalaad, hibbadda, sugaanta, caafimaadka, maamulka ganacsiga, maamulka huteelada /makhaayadaha, iyo cilmiga duulimaadka iyo hawada. Si laguu aqbalo inaad ka mid noqoto barnaamijka ama magned iskuulka waa inaad soo gudbisaa codsi. Ardayda loo ogolaado iney ku biiraan magned iskuulka waxaa laga soo bedelaa iskuulka ku yaal aaga ay degens yihiin waxaana loo soo bedelayaa magned iskuulka. Ardayda ku nool meel ka fog laba mayl magned iskuulka waxaa la siinayaa gaadiid geeya xaafadaha. Wixii faahfaahin ah ee ku sahabsan habka codsashada magned iskuulka fadlan soo booqo xafiiska Magned iskuulka ee ku yaal 4400 W 18$^{th}$ St. ama kala hadal xafiiska Magned Iskuulka Tilifoonkan 713-556-6947.

### Waxbarashada Sare

Si loo haqab-tiro bahiyaha ardayda hibadda iyo kartida leh, dugsigyada dhistariga ee gaarka ee Houston waxay leeyihiin nidaam furfuran oo wax ka taraya baahiyaha ardayda hibbada iyo kartida saa’idka leh. Barnaamijyada Hibbadda iyo Kartida (Gifted and Talented) oo loo soo gaabsado (G/T) ayaa waxaa u jeedadoodu tahay in la abuuro jawi ardayda noocan ah u saamaxaya iney sida ugu haboon uga faa’iidaystaan maskaxdooda. Si haddaba wax looga qabto baahiyaha ardayda waxbarashada ku leh kartida iyo hibbadda, manhajka iyo wax-baristuba way ka duwan yihiin sida caadiga ah. Waxaana loo dhigay manhajkooda hab qoto dheer oo ka kakan ka caadiga ah isla markaana barnaamijka guud ee iskuulkoodu waa mid ay la jaanqaadi karaan. Waxaa jira laba barnaamij oo loogu talo-galay ardayda loo aqoonsado iney leeyihiin hibbo iy karti waxbarasho. Labaddaa barnaamij waxaa la kala yidhaa: Fangaadh (Vanguard) iyo Sayt (SIGHT). Si aad uga mid noqoto mida ka mid ah laba barnaamij waa inaad soo gudbiso codsi kaas oo ka bilaabmaya in horta marka horeba lagu qiimeeyo iyadoo la raacayo

shaxda kartida iyo hibbada. Qiimayntan waxaa lagu ogaan doonaa inaad leedahay kartida iyo hibbada waxbarasho ee la rabo haddii aad yeelan waydo waxaa kuu banaan inaad sanadkiiba hal mar soo codsato.

Barnaamijka Vanguard waa mid ka jira degmada oo dhan waana barnaamij loogu talo galay inuu wax ka qabto baahida ardayda Hibbada iyo Kartida leh ee heerka K-12 wuxuuna abuurayaa jawi isku mid ah oo ardayda fahankoodu sareeyo ay wax ku kala faa’iidaysan karaan. Ardayda ku soo baxda ama loo qaato Vanguard waxaa laga soo bedelayaa iskuulka xaafadooda waxaana la keenayaa dugsi leh Vanguard.Ardayda ka fog iskuul leh Vanguard qiyaas laba mayl ah waxaa loo samaynayaa gaadiid keena ama qaada. Waxaa jira 11 dugsi hoose, 8 dugsi dhexe ah, iy 1 dugsi sare ah kuwaas oo uu ka socdo barnaamijka Vanguard.

Barnaamijka labaad ee ardayda hibbada iyo kartida leh ee heer dugsi hoose/dhexe waa kan la yidhaa sayt ama SIGHTS oo ah xarfo la soo gaabiyey oo ka soo jeeda *Supplemental Instruction for Gifted, High Achieving and/or Talented Students (SIGHT*). Barnaamijkan sayt waxaa isna loogu talo galay ardayda hibbadda iyo kartidda waxbarasho leh in wax lagaga qabto baahidooda waxaanu ka socdaa iskuulka xaafada. Ardayda waxaa la xushaa xili hore sida 1-da maarso ee sanadka kowaad ee kindargaardhankooda. Dugsiga ayaan go’aan ka gaadha sida iyo qaabka loo bixinayo xiisadaha. Marka la dejinayo barnaamijka ayaa manhajka iyo habka-barristaba laga duwaa kan la siinayo ardayda caadiga ah. Haddii arday loo qaatay barnaamijkan uu ka waayo iskuulka xaafadooda ku yaal waxaa loo bedelayaa iskuulka kale ee ugu dhow ee uu ka socdo barnaamijkan Sayt.

Wixii war faahfaahsan ah fadlan kala xidhiidh xafiiska Academics Support Services ee ku yaal 4400 W 18th St., tilifoonkooduna yahay 713-556-6906.

**Dugsiyo Jaartarka ah ee HISD (HISD Charter Schools)**

Si ay u rumeyso ballanqaadkii ahaa in dhalinyarta Houston ay helaan waxbarasho tan ugu fiican ayaa HISD waxay bilowday nidaam meelmar noqday oo ah iskuulo is-maamula ama jaartar iskuulo. Jaartar iskuulkada HISD waxay isugu jiraan min dugsi dhamaystiran oo sooc ah ilaa mid iskugu jira dugsi caadi ah iyo mid jaartar iskuul ah. Dugsi walba waxaa bartilmaameed u ah inuu daboolo baahi waxbarasho oo jirta sida waxbarasho dugsi hoose oo ku baxda laba luuqadood iyo barashadda dhaqamo kala duwan oo la siiyo ardayda la qabsan-waagu ku dhaco. Jaartar iskuulada HISD habab cusub ayey wax ugu dhigtaa ardayda iyagoo ka faa’iidaysanaysa taageerada buuxda ee HISD bixiso.

Jaartar iskuulada HISD yaan lagu qaldin iskuulada uu ansixiyey gobolku ee is-qoristoodu furan tahay. Iyaddoo sideedaba iskuulada is-maamula ayna qaban baddi shuruucda iyo qawaaniinta Teksas (Texas) sida in macalimiintu ay sitaan shahaadooyin oo kale ayaa jaartar iskuulada HISD waxa laga rabaa iney racaan jid loo jeexay oo lagu sugayo tayadooda.

**Barnaamijka Ardayda Luuqadda Ingiriisku ku Adag tahay**

Iyaddoo la raacayo nidaamka hay'ada waxbarashada Teksaas (Texas Education Agency) ayaa HISD waxay abuurtay barnaamijyo wax-barid ah oo loogu talo galay baahiyaha iyo xiisaha khaaska ah ee ardayda. Barnaamijyadan waxaa ka mid ah kuwo loogu talo galay ardayda ku fiican aqoonta ee derejaadoodu sarayso, ardayda curyaamiinta ah, ardayda halista ugu jira iney ka saaqidaan iskuulka, iyo hablaha ardayda ah ee uurka leh iyo weliba adeegyo kale. Ardayda dugsiga hoose ee afkoodu yahay isbaanishka, dhistarigu wuxuu siiyaa barnaamij laba luuqadood ku baxa oo kor-u-qaadaya xifadooda barashada luuqada ingiriisiga iyadoo la isticmaalayo habka u-barashada luuqada ingiriiska af-qalaad ahaan (English as a Second Language-ESL). Ardayga oo casharka loogu sharaxo afkiisa hooyo waxay keenaysaa in arday uu keeno derejo fiican isla markaana waxay ka hortagtaa in ardaygu dib-u-socod noqdo. Barnaamiyada labadda-af ku baxaa waxay ardayda siiyaan fursad ayna ku ilaawin af-koodii hooyo (waa isbaanish-kee) isla markaana ay ku bartaan luuqada ingiriiska. Ardayda aan u dhalan afka ingiriiska ee ku hadasha luuqado kale waxaa la siiyaa xiisado ESL-ah kuwaas oo ay bixiyaan barayaal u tababaran af-barista.

Xeer Lambar III Ee Barnaamijka Waxbarashadda Muhaajiriinta (**Title III Immigrant Education Program**) waxa ujeedadiisu tahay in laga taageero lagana caawiyo ardayda HISD iney kor u qaadaan heerkooda luuqada ingiriisiga iyo tacliintooda. Si aad uga mid noqoto barnaamijkan waa inaad ku dhalatay meel aan ahayn maraykanka aadna ka dhiganaysay iskuul halkan wax ka yar saddex sano. Adeegyada la bixinayo waxaa ka mid ah xiisado ESL ah, foojaro loogu talo galay koorsoyinka la daynsado lacagtooda ee dugsiga sare, waalid soo dhawaynta, iyo macluumaad ku sahabsan fursadaha waxbarasho ee ka jira kulliyadaha looguna talo-galay ardayda soo-galaytiga.

Wixii war ee intan ka faahfaahsan ama adeeg ah waxaad kala xidhiidhaa Tilifoonka Waaxda Barnaamijka Afafka-Badan (Multilingual Programs Dept.) oo tilifoonkoodu yahay 713-556-6961.

**Dugsiga Xagaaga**

HISD waxay siisaa ardayda fasalka 1aad ilaa 8-aad ee aan helin dalacsiinta waxbarasho xagaagii. Haddii aad doonayso inaad ogaato BAL in ilmaahaagu helayo dalacaad iyo inkale la soo xidhiidh macalinkiisa. Barnaamijyo xagaagii ah oo dheeri ah oo loogu talo galay ardayda barata luuqada ingiriiska ayaa waxaa ka mid ah xiisado la siiyo ardayda kindargardhanka iyo kuwa aan weli soo gaadhin kidargaardhanka si loo dedejiyo barashadooda luuqada ingiriiska. Warbixinta ku sahabsan barnaamijyadan waxaa lagu qaybiyaa dugsi kasta bisha abriil.

Ardayda dugsiga sare waxa dhici karta iney kuu biiraan xiisado ESL-ah oo degdeg ah amase ay isticmaalaan foojarada fiida dhigashada koorsooyinka dugsiga sare ee la daynsado waa haddii ay ku soo baxaan. La xidhiidh la-taliye-haaga ama waaxda barnaamijka afafka –badan (Multilingual Department) tilifoonkoduna yahay 713-556-6961.Iyaga ayaad ka helaysaa wixii war ah ku sahabsan fursadaha waxbarsho ee xagaagii. Dhamaan wararka ku sahabsan waxbarashada xagaagii ee HISD waxa laga heli kara boga Internet ee HISD www.houstonisd.org.

**Waxbarashada Tiknoolijadda iyo Mihnadda**

Laanta waxbarashada Tiknoolijiyada iyo Mihnada ee HISD (Career and Technology Education Department) oo loo soo gaabsado CATE waxaa loo sameeyay bog internet-ka ah oo cusub kaas oo qayb ka ah isku xidhka HISD.Ciwaanka waxaa laga helayaa www.houstonisd.org/cate

Ujeedada CATE ayaa ah in xoojiyo ardayda heerkooda farsmo iyo kan aqooneed ee lama huraanka u ah iney najaxaan. Barnaamijkani wuxuu u diyaariyaa ardayda mihnado kala duwan isagoo siinaya aqoon kala duwan oo u saamaxaysa iney sii wataan waxbarashooda ilaa heer jaamacadeed ama iney u lexdeen oo bartaan xirfado kale sida cilmiga beeraha, sayniska, war-isgaadhsiinta, warbaahinta, caafimaadka iyo tiknoolajiyada, farsamada suuq-geynta iyo ganacsiga iyo maadooyin kale oo kala duwan.

## WARBIXINTA ISKUULKA

### Gaadiidka

HISD waxay ka bixisaa baska ardayda xaq u yeelata una gudbisa codsi xidhiidhiyaha gaadiidka ee dugisgooda isla markaana ay ansixiyaan waaxda gaadiidka. Ardayga aan xaq u yeelan in baska laga bixiyaa waxaa kafaala qaadaya baskooda waalidkooda ama cida kale ee ka masuulka ah.

Ardayda HISD waxaa u diyaar ah tareeno (METRO) u jebiyey qiimaha. Faahfaahinta ku sahabsan qiimo-dhimista ay tareenadu u sameeyeen “dhalinyarta’ iyo “Ardayda” iyo weliba jadwalkooda ayaa waxaa laga helayaa bartooda internet-ka halka ay ku qoran tahay “Fare Information” ama soo wac tilifankooda oo ah METRO Line at 713-635-4000.

Wixii war ku sahabsan xaq-u-yeelashada baska iyo meelaha laga raaco, la xidhiidh isu-duwaha gaadiidk ee dugsigaaga ama la tasho laanta adeega gaadiidka (Transportation Services Department) ee bogoodu yahay www.houstonisd.org/transportation ama jadwalka iyo dariiqa baska 713-676-9218.

### Shuruudaha Is-qorista

Dugsiyada hoose ee HISD, ardayna looma ogola inuu habsaamo wax ka badan **sideed** (8) habsan oo aan sabab lahayn sannadkii. Dugsiga sare ardayna looma ogola inuu habsaamo wax ka badan **afar** (4) habsan oo aan sabab lahayn xili-dugsiyeed ah 18 todobaad. Xili-dugsiyeed la dedejiyey oo ah sagaal-todobaad, ardayna looma ogola inuu habsaamo wax ka badan **laba** (2) habsan oo aan sabab lahayn sagaalkii todobaad. Xilli-dugsiyeedka kale oo kasta ugu badnaan ardayga looma ogola wax ka badan **laba** (2) habsan oo aan lahayn sabab teeramkii ama ugu badnaan **afar** (4) habsan oo aan lahayn sabab sannadkii. Maamulayaashu ayaa cudur daari kara xanuun ku yimaad ardayga, geeri ku dhacda qoyska ama sabab kale oo macquul ah. Barayaasha ayaa siinaya ardayda fursad ay kaga soo kabtaan wixii seegay intii ay maqnaayeen waxaana jira nidaam loo codsado dhibcaha kaa luma habsan badan awgeed. Wixii war ah ee intaa dheer soo wac xafiiska sharci-raacida ee federaalka ama gobolka (Federal and State Compliance) oo tilifoonkoodu yahay 713-556-6731.

**Saacadaha Dugsiga**

Dhamaan dugsiyada HISD waa la tagaa min Isniinta ilaa jimcaha, dugsi walbana waxaa lagujiraa todoba sacadood. Sacadaha galista iyo bixida dugsiga iskuuladu way kula duwan duwan yihiin sidaa darteed waxaa kuu fiican inaad la xidhiidho dugsigaaga si aad u ogaato xilliga la galo iyo xilliga bixida.

Sannadkii dhowr jeer waxaa dhacda in ardayda la sii daayo waqti ka horeysa xiliga bixida ee caadiga ah si loo qorsheeyo wax-dhigista, khibrada ama waalidku hawlo ay ka wadaan dugsiga. Dugsi walba isagaa qorsheeyaa maalmaha hore loo rawaxo sidaa darteed la xidhiidh dugsiga ilmahaagu dhigto si aad u ogaato maalmahan hore loo rawaxayo sannadka.

**Ardayga oo la fasaxo saacadaha iskuulka**

Waxaa laga yaaba in arday la fasaxo saacadaha shaqada hasa ahaatee qofka loo fasaxayaa waa inuu yahay qofkii saxeexay foomka ardayga diiwaangelinta, waa inuu yahay masuulka ilmaha ama waa inuu yahay qof ogolaansho qoraal ah ka sita waalidka ilmaha. Qofkaas ugu horeynba waa inuu iskuulka tusaa aqoonsigiisa.

**Qureec iyo Qaddo**

Cunto nafaqo leh ayaa ku diyaara dhamaan dugsiyada HISD.Siddoo kale HISD waxaa laga heli karaa cunto bilaash ah ama qiimo-jaban lagu gato oo ay gadan karaan ardayda danyarta ah. Foomamka codsiga waxaa laga heli karaa xafiiska iskuulka ama Waaxda Adeega Cuntada (Department of Food Services). Booqo bogooda internet-ka http://www.houstonisd.org/Departments/site_front/0,3121,24462227,00.html.

**Booqashadda Dugsiyada**

Xubnaha ka tirsan bulshaweyntu way soo booqan karaan dugsiyada HISD.Hasa ahaatee, soo booqde kasta waa inu saxeexaa buuga xafiiska dugisga uuna fiirsadaa nidaamka dugsiga. Booqashooyinku waa ineysan qalin-daarin hawlaha dugsiga

**Warbixinta Qiimaynta/Tijaabadda Ardayga**

***Qiimaynta Teksaas ee Aqoonta iyo Xirfadaha (*Texas Assessment of Knowledge and Skills)** oo loo soo gaabsado TAKS wuxuu ku salaysan yahay manhajka gobolku ansixiyey ee loo yaqaan Xirfadaha iyo Aqoonta aasaasiga ah ee Teksaas (Texas Essential Knowledge and Skills) oo loo soo gaabsado TEKS.Qiimayntan TAKS waxay taabanaysaa meelo badan oo ka mid ah manhajka gobolka waxayna xooga saaraysaa xirfadaha fikirka iyo xalinta mashaakilka. Ardayda waxaa dhiibaa qoraalo ay tahay iney akhriyaan, si heer sare ah u lafa-guraan, is-barbar dhigaan fikradaha kadibna soo koobaan fahankoodaSi fiican oo looga shaqeeyo TAKS-ka u dambeeya waxay lagama maarmaan u tahay qaadashada dibloomada dugsiga sare

***Taariikhhaha imtixaanadaTAKS iyo TELPAS***

| | |
|---|---|
| February | Gr. 3, 5, & 9 Akhriska TAKS |
| March | Gr. K-12 TELPAS (Maarso iyo April)<br>Gr. 4 , 7, 10 Qoraalka TAKS |
| April | Gr. 3-10 Xisaabta TAKS<br>Gr. 3-7 Akhriska TAKS<br>Gr. 8 & 10 Cimiga Bulshada TAKS |
| May | Gr. 5, 8, 10 & 11 Sayniska TAKS Science<br>Gr. 8, 10, 10 & 11 Cilmiga Bulshad TAKS |
| June | Gr. 3, 5 & 8 Akhriska, Xisaabta (imtixaan ku celin) |

Natiijada qiimaynta **TELPAS** (oo markii hor la odhan jiray RPTE iyo TOP) oo ku siinaysa qiyaasta horumarka barashada luuqadaha ingiriiska ee uu arday walba ku talaabsaday sannadkii waa mid loo dejiyey dadka barta luuqadaha qalaad. Warbixinta qiimaynta TELPAS waxaa buddhig u ah horumarka ay ka sameeyaan qiyaastan taas oo iyana fure in dhistarig-yadu la socdaan bal in bal barashada akhriska, qoraalka, iyo ku-hadalkoodu luuqada Ingiriisku uu samayno kor-u-kac. Dhamaan ardayda fasalada K-12 waxaa lagu qiyaasi doona qiyaasta TELPAS ilaa iyo LPAC u aqoonsato iney ka gudbeen maxaa yeelay waxay buuxiyeen shuruudaha lagaga gudbayey. Shuruudahani waxay khuseeyaan dhamaan ardayda LEP ama laba af wax ha loo dhigo ama ha ku jiro ESL ardaydan waxaa ka mid ah kuwa waalidkoodu diidan. Heerarka TELPAS waa afar: Bilow, Dhexdhexaad, Sare, and Aad u saraysa. Ardayda LEP ee curyaanimo awgeed geli Kari waaya qiimaynta TELPAS waxaa laga yabaa iney gudida ARD ka reebto qiimaynta. Ardaydan noocan ah waa in la cadeeyaa in ARD ka reebtaa qiimaynta sidaasna faylka LEP loo geliyaa.

1. **Akhriska TELPAS** dhamaan ardayda LEP ee fasalka K-12 waxaa lagu qiimayn doona qiimaynta TELPAS qaybta cabirta akhriska .Arday oo akhriskiisa lagu cabiro TELPAS kama saari karto ardayga LEP , maxaa yeelay qayb kama shuruudaha lagaga baxo LEP.Ardayda fasalka K-1 si caadiya ayaa loo qiimaynayaa akhriskooda .Ardayda fasalka 2-12 qiimaynta TELPAS waxay noqonaysaa qoraal

2. **Dhagaysiga iyo Hadalka TELPAS** dhamaan ardayda fasallada K-12 waxaa lagu qiimayn doonaa awoodooda dhegaysi iyo tan ku-hadal ee luuqada ingiiriska. Qiimayntu waxay ku salaysnaan doontaa indha-indhaynta inta fasalka la joogo.

3. **Qoraalka TELPAS** dhamaan ardayda LEP ee fasallada K-12 waxaa la qiimayn doonaa iyaddoo la eegayo awoodooda qorista ingiriiska Ingiriisida.Fasalada K-12, qiimayntu waxay ku salaysnaan doontaa indha-indhaynta ardayga ee fasalka dhexdiisa. Fasalada 2-12 ardayda waxaa qiimayn doona macalimiintooda iyagoo eegaya Shan qoraal oo soo sameeyaan.

Ardayda LEP waa laga saari doona barnaamijyada labadda-af ama kuwa ESL-ka ah marka ay ka soo baxaan shuruudaha taas oo ku salaysan aqoontooda afka ingiriisiga ee dhinacyada: dhagaysiga, ku-hadalka, and akhriska iyo qoraalka. Qiimayno kala duwan ayaa la isticmaali doonaa si go'aan looga gaadho horumarka ardaygu ka sameeyay afartaa dhinac taas oo ku xidhan fasalka uu ku jiro. Qiimaynahan waxaa ka mid ah TAKS, Stanford, TELPAS, IPT Oral Language and IPT Early Literacy Writing.

Tijaabada la yidhaa **Stanford 10 Achievement Test** waa imtixaan ingirisi ah oo la maro. Isbaanishuna wuxuu leeyahay imtixaan kaas aan soo sheegnay oo kale ah oo la yidhaa **Aprenda 3.**Heerka wax-akhris ee ardayga ayaa go'aan ka gaadhaysa imtixaanka uu qaadanayo. Dhamaan ardayda LEP waa iney qaataan imtixaankan haddii ay ku jiraan barnaamijka labadda-luuqadood iyo haddii ay ku jiraan ESL-kaba ama barnaamij kale oo caadi ah..HISD waxay ka doonaysaa dhaman ardayda fasalada K ilaa 12 aad iney dhamaystiraan qiimayntan.Inta badan bisha Abriil ayaa la qaadaa imtixaankan.

**Tejas LEE** waa hab macalimiintu u isticmaalaan si ay u qiimeyaan heer wax-akhris ee dhamaan ardayda LEPee fasalada K-1 iyo fasalada 3aad. Dhamaan ardayda LEP ee fasallada K-1 waa iney galaan imtixaanka Tejas LEE sanadka dhamaadkiisa waxana qaadan kara uun ardayda keenta natiijada "still developing'ama "Weli soo kacaya'. Ardayga afka uu wax ku akhriyo ayuun baa lagaga qaadayaa imtixaanka. Habkani wuxuu ka caawin karaa macalinka afka uu ku bixinayo xiisadaha. Habkan Tejan LEE looma isticmaalo in ardayda lagu dalacsiiyo ama halkooda lagu hayo.

**High Frequency Word List (HFWL)** waa qiimayn liis ah ay dejisay Laanta Akhriska ee Reading Department ee ee HISD.Liiskan waxaa la siiyaa waalidka ardayda dhamaan ardayda fasalka kowaad iyo labaad bilowga sannad dugsiyeedka. Qiimayntan waxa laga qaadaa ardayda fasallada kowaad iyo labaad bilowga gu' walba. Ardayda waxaa laga rabaa iney qaybaan liiskan isagoo Ingiriisa ah iyo isagoo Isbaanish ahba taas oo tusinaysa sida saxnimada iyo faseexnimada ereyada inta badan la isticmaalo. Qiimayntan HFWL waa mid ka mid ah miqaasyada loo isticmaalo dalacsiinta ardayda.

**Miqiyaaska Dalacsiinta**

Si loo dalacsiiyo arday HISD ka tirsan waa in ardaygaasi muujiyaa inuu bartay aqoontii gobolka Teksaas uu uga baahnaa ardayda dhigata dugsiyada dawliga ah. Miqiyaaska dalacsiinta ee HISD waxaa ka mid ah dhibcaha fasalka, imtixaan heer degmo ama heer gobol ah, iyo mid heer qaran ah. Faahfaahinta macluumaadka ku sahabsan dalacsiinta waxaa la wargeliyaa waalidka iyo ardayda dhamaadka sannad-dugsiyeed kasta. War intaa ka faahfaahsan fadlan la xidhiidh sharci-dhowrka federaalka ama gobolka Federal and State Compliance oo tilifoonkoodu yahay 713-556-6731

**Shuruudaha Qalin-Fulinta**

Dhamaan ardayda HISD waa iney keenaa 24 dhibcood si ay uga qalin-fulaan ama qalin-jebiyaan dugsiga sare. Marka laga yimaad iney dhamaystiraan shuruudaha koorsooyinka waxa kale o laga rabaa iney iney ka gudbaan qiimaynta ka-bixida ee gobolku ansixiyo.

Arday noqotay fasalka sagaalaad sanad-dugsiyeedkii 2001-2002 ama wixii ka dambeeyay waxaa laga rabaa marka ay yihiin fasalka kow iyo tobnaad iney ka gudnaan qiimaynta TAKS-ka.Intaa waxa dheer in la qoro ardayda barnaamijka lagu-taliyey ee dugsisa sare. Marka ay dhamaystiraan barnaamijkan ardayda waxaa loo aqoonsadaa Aqoon-yahanada Teksaas Texas scholars.

Faahfaadhinta ku sahabsan dhibcaha koorsooyinka, la tasho la taliye-haaga dugsiga sare ama la soo hadal laanta hanuuninta iyo talosiinta oo tilifoonkoodu yahay 713-556-6731.

**Warbixinta Dugsiga**

Sharciga gobola ee “ la-gudbi waa/ciyaar la waa” ama afka qalaad lagu yidhaa “no pass/no play” wuxuu leeyahay arday kasta oo keen derejo ka hoosaysa 70 (ama wax u dhigma) kooras walba looma ogola inuu ka qaybqaato hawlaha kabka u ah manhajka sida ciyaaraha saddex todobaad ee ee xilli-imtixaaneedka xiga. Inta ardaygu ku jiro mudadadaaa wuu sii wadan karaa inuu la tabobaran karaa ardayda balse laga yeeli mayo inuu ka qaybgalo tartan haddii aanu ka reebanayn xeerka gobolka.

Dugsiyada hoose ( iyo qaar ka mid ah dugsiyada sare) waxay u diraan waalidka kaadhka warbixinta ardayga afar-jeer sannadkii , wax yar uun ka dib dhamaadka xilliga sixida :Oktoobar,Janaayo,Maarso,iyo May.

Dugsiyadda hoose iyo kuwo sare waxay u diraan waalidka kaadhka warbixinta ardayga lix goor sannadka gudihiisa, wax yar uun kadib xilliga sixida lix-toddobaadlaha ah: Oktoobar, Noofambar, Janaayo, Maarso, May, iyo Juun. (Qaar ka mid ah dugsiyada dhexe iyo kuwo sare ayaa leh sixid-sagaal todobaadle ah; fiiri jadwalka dugsiyada hoose eek or ku xusan)

Haddii arday aanu samaynayn horumar lagu qanco, waalidka waxa loo diraa warbixin hordhac ah badhtamaha xilliga-sixida iyo waqtiyaddii kale ee daruuri noqda. Waalidku waa iney saxeexaan warbixinta hordhaca ah soon celiyaan.

**Kaadhka Warbixinta iyo Derejooyinka**

| Maadooyinka | Calaamado (Conduct) |
|---|---|
| *90-100* = aad u fiican E | E = excellent |
| *80-89* = fiican ; ka sareeya dhexdhexaad S | S = satisfactory |
| *75-79* =lagu qanco;dhexdhexaad P | P = poor, below average |
| *70-74* = Gudbid; ka hoseeya | U = unsatisfactory |
| *Below 70* = Dhicid; U | |

**Abla-ablaynta Dhibcaha**

Dugsiga sare, dhibcaha guud ee ardayga ayaa go, aamiya meqaankiisa tusaale ahaan sannadka uu yahay. Siyaadasada Guddida Waxbarashada ee khusasaya abla-ablyanta ama kala saarsaarida waxaa si cad loogu sharaxay siyaasada gudida HISD ee EIE

**Abla-ablayn** **Dhibcaha**

| | |
|---|---|
| Fasalka 9 (freshman) | 0 - 5.5 |
| Fasalka 10 (sophomore) | 6 - 11.5 |
| Fasalka 11 (junior) | 12 - 17.5 |
| Fasalka 12 (senior) | 18 ama ka badan |

**Fahan Kaadhka Warbixinta ee Ilmahaaga**

Kaadhka warbixinta looguma talogelin in lagu cabiro maskax-badnida ilmahaaga balse waa hab aad ku ogaan karto maadooyinka ilmahaagu ku fiican yahay iyo kuwa uu kala kulmayo dhibta ama ku adag. Hoos ka fiirso talooyin:

- Is-deji marka ilmahaagu keeno kaadhka warbixinta.
- Xasuusnow in ilmuhu u baahan yahay waqti uu kula qabsado dugsiga cusub ama xaafada cusub
- Inta uu la qabsanayo ilmaha waxaa laga yabaa iney ku adkaato soo dhamasytirka shaqo-gurida. Waxaa laga yaabaa in ilmuhu uusan garanaynba waxa uu ka doonayo degaankan iskuulka ee ku cusubi
- U sheeg ilmahaaga inaad doonayso inuu/iney ku guulaysatao waxbarashadeeda.
- Suaalo ka weydii dhibcaha ugu qoran kaadhka warbixinta. Dhibcahanni miyey yihiin kuwii u filayey ilmuhu?
- Weydii suaalo togan ama nasteex ah: “Maxaad u malayneysa in ay xisaabta kug adkeeyeen?” “Maxaan sameeyaa si aan kuu caawiyo?”
- Xasuusnow waxaa laga yaabaa in ilmaha ay ku adkaato inuu sharaxo dhibtiisa.
- Kala sheekayso ilmaha siddii aad wadajir u horumarin lahaydeen dhibcihiisaWay fiican tahay hadii aad ka doodaan qorshaha ilumuhu ka leeyahay dugsiga.
- Ogow meelaha ilmahaaga dhibtu ka haysatoWaa waajibaad iyo masuuliyad ku saran inaad ogaato. Isla dugsiga waxaad qaban karto si aad xaliso dhibtan.
- Kaadhadhka warbixinuhu waxay inta badan tusiyaan xirfadaha iyo dhaqanka wax-akhris ee ilmaha.

## WARBIXINTA WAALIKDKA

**Shirka Waalidka iyo Macalimiinta**

Waalid badan ayaa yar xishooda marka ay la hadlayaan hawl-wadeenada dugsiga. Inaad falanqayso horumarka waxbarasho ee ilmahaaga waa waajib iy masuuliyad ku saran. Macalimiintu way soo dhawaynayaan waalidka xiisaynaya iney aaraa keeno. Maanka ku hay inaad weydiiso suaal mucayin ah

- Marka hore la hadal dugsiga balana la samayso.Haddii ilmahaagu leeyahay hal macallin wax ka badan , qorshayso inaad la kulanto ugu yaraan laba macalin halkii shir ee aad yeelatababa
- Fiiri suaalahan hoos ku qoran ee muunada ah:
    1. Waa maxay meelaha uu ka liito iyo meelaha uu u ku fiican yahay ilmahaygu?
    2. Siddee ayaan u wadda shaqayn karnaa si aan ilmahayga u caawino?
    3. Waa maxay ujeedooyinka xiisadani? Hadii si kale loo dhigo, maxaa la filayaa inuu faaiidaysto ilmuhu dhamaadka casharaddan?

4. Marka xiisadaha lagu jiro, ilmahaygu ma dhagaystaa sharaxa? Haddii ay maya tahay jawaabtu waayo, maxaan samayn karnaa si aan u caawino?
5. Ma I soo wici kartaa marka dhibcaha ilmahaygu hooseeyaan?

- Addinkoo isku duuban adiga iyo macallimiintu xal waara ka gaadha mashkilladaha waxbarasho ee haysta ilmaha?
- U sheeg ilmahaaga inaad macallimiinta kala shaqaynayso sidii uu/ay u noqon lahayd.

**Abuurid Dhaqan Wax-Akhris oo Midho dhal leh**

Waalid ahaan waad xaqiijin kartaa in ilmahaagu si fiican wax u barto. Waalidiin badan ayaan hadda iyo goor fahmin duruusta la soo siiyo caruurta. Si kastaba ha ahaateen, Waalidiinta oo dhan way waxay guriga ka abuuri karaan jawi u sahla ilmaha inuu yeesho dhaqan wax-akhris ama wax-dhigasho.

- Isku day inad u gado ilmaha shandada dhabarka lagu qaato taas oo uu ku ridan doono agabka dugsiga iyo layliyada uu kala imanayo ama la tagayo dugsiga.
- Caadayso inaad maalin walba marka ay soo hoydaan inaad gacanta geliso shandadiisa /shandadeeda si aad u hubiso walxaha ugu jira. Fursadan waxa kale oo aad uga faaiidaysan kartaa inaad la eegto layliyada.
- Waqti uu ilmuhu wax-akhristo kagana shaqeeyo layliska u samee. Waxaa haboon in marba marka ka dambeysa u sii qabatimo xiligan aad u dejisay. Inta badan waxaa fiican cashada kadib lakin yayna ka dambayn 9:00 habeenimo.
- Xoogaa dabacsanaan ah ayaad ka samayn kartaan dhinaca jadwalka wax-akhrtiska haddii adiga iyo waalidku iskula qorshaysaan si taxadar leh. Haddii munaasibado ku soo beegmaan xilliga wax-akhriska waad u ogolaan kartaa lakin waa in wixii layliska iyo wax-akhriska la siiyaa mudnaanta kowaad. Sida labadan la iskula helo waxaa haboon in marka ilmuhu soo rawaxo uu dhamaystiraa hawlaha u yaal.
- Xadid daawashada tilifishanka ee caruurta maalmaha ay iskuul leeyihiin. Isku day ineysan daawan hal saac wax ka badan. Fiirsashada tilifishanka oo waxay si toos ah u saameysaa dhibcaha ilmahu ka helayo imtixaanada.
- U habee meel gaar ah oo canugu wax ku akhristo si uu u dhamaystiro laylisyada iyo shaqo gurida .Taa macnaheedu maaha inaad u soo gado miisas, kabadho iyo kuraas qaali ah. Miis yar oo iska caadi ah sida kan madbakha oo kale waa ku filan yahay. Xataa caruurta iyagoo beerka u jiifa ayay hadana si fiican wax u akhrisan karaan. Waxaad ku dedeshaa uun in meesha wax-akhrisku noqoto meel degan .
- HISD waxay leedahay kanaal tilifishan channel (Time-Warner channel 18, TCI channel 39 and Optel channel 70) kaas oo soo daaya barnaamijyo waxbarasho oo loogu talo galay waalidka iyo ardayda.

**Cayminta Ardayda iyo Adeega Caafimaad ee Dugsiga**

Dugsiga ayaa la soo xidhiidhiya waalidka, qof ehel la ah ardayga, ama saxiib haddii arday xanuunsado ama waxyeelo kale soo gaadho. Kaadhka ardayga ku hubso dhamaan tilifoonada la wici karo marka xaalad degdeg ahi dhacdo. Inta ilmuhu dugsiga ku sugan yahay, waxaa dawo siin kara oo keliy hawl-wadeen uu maamuluhu u xil saaray weliba

waa in la helaa ogolaanshaha waalidka iyo dhakhtarka qoraal ah oo la sii fayl gareeyay mar hore.

Sharciyan dugsiyada dawliga ah loo qabsan mayo waxyeelada soo gaadho ardayga inta uu dugsiga joogo. Lakin HISD waxay kuu diyaarisay caymis qiiman jaban ah shilalka ka dhaca dugsiga. Waalidku way cayman karaan ilmohooda caymis buuxa (24 saacadood maalintii) ama caymis ku-eg saacadaha ilmuhu dugsiga joogo. Agabka is-qoristu xafiis kasta oo dugsiga ah wuu yaalaa.

**Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Caruurta (Children's Health Insurance Program -CHIP)**

Barnaamijkan caymiska ah waxaa loogu talo galay qoysaska ladan ee aan loo ogolayn daryeelka caafimadka dawliga ah isla mar ahaantaana aan iska caymin karin shirkadaha caymiska ee gaarka loo leeyahay. Waalidiinta qoysaskani waxay haystaan shaqooyin aan lahayn caymis caruurta ah. Waalidiin kale shaqooyinkoou way leeyihiin caymis lakin waa qaali in la is caymiyaa mana awoodaan. La hadal tilifoonkan 1-800-647-6558 si aa warar dheeri oo ku sahabsan barnaamijkan CHIP amabase aad tilifoonkaba uga codsato

**Barnaamijka Waalidnimada, Waxbarashada, iyo Uurka (Pregnancy, Education and Program Parenting -PEP)**

Barnaamijkan oo uu gobolku maalgeliyo waxaa loogu talogalay in lagu dhimo tirade ardayda ka baxda ama ka saaqida dugsiga sababo la xidhiidha uur yeelasho iyo/ama waalidnimo waxaan looga dan leeyahay in lagu taageero waalidiinta da'da yare e cimrigoodu ka hooseeyo 21 jirka. Barnaamijkan wuxuu ka jiraa 12 dugsi oo ka tirsan HISD.Lix ka mid ahi isla dugsiga ayey ku daryeelaan caruurta. Wixii warbixin intaa dheer la xidhiidh 713-349-7423.

**Adeegyada la xidhiidha Xaamilada (Pregnancy Related Services)**

Adeegyada loo qoondeeyay xaamiladu waa ku taageero siinaya ardayada uurka leh una saamaxay iney waxbarashada wadato inta ay uurka iyo Sidoo kale adeegyo khaas ah oo barnaamijkani wato waxaa ka mid: La-talin, Adeeg caafimad iyo waxbarasho, gadiid, maarayn, casharo, daryeel canuga ah, iyo Waxbarista guriga ee qasabka ah (Compensatory Education Home Instruction) loona soo gaabsado CEHI.CEHI waa barnaamij ardayga guriga ama cisbitaalka wax loogu dhigo marka uur dartii ay iman kari weydo fasalka. CEHI waa xidhiidh fool-ka-fool ah oo u sameynayo macalin u tabobaran oo dhistariga ka .Faafaadhinta kala soo xidhiidh 713-349-7423.

**Ku-lug lahaanshaha Waalidka (Parental Involvement)**

Waalidka iyo bulshada inteeda kale waxay saamayn ku yeelana karaan horumarka waxbarasho iyo kan shaqsiyeed ee ardayda iyagoo taageeraya kana qaybqaadanaya hawlaha iyo barnaamijyada uu waddo xafiiska Xidhiidhada Istaraatijiga ah 713-556-7200, kaas oo uu ka mid yahay ka-soo qaybgelinta waalidka iyo xidhiidhka bulshada

- **Xarumaha Waalidka** waxay ku yaalaan dhamaan dhistariga oo dhan. Xarunta waxay u jirtaa iney ka jawaabto suaalaha waalidka iyo iney u

diyaariso waxyaabaha ay u baahan yihiin sida fasalo ingirisida lagu barto iyo wax-qoris-akhriska qoyska, xirfadaha waalidnimada, tababarka kombuyuutarka, u diyaar garowga GED-ga, iyo agab kale oo wax lagu barto oo guriga loo qaato.

- **Barnaamijka Hogaaminta Waalidka** wuxuu waalidka ka caawiyaa barnaamijkani ka mid ahaanshaha PTO-yada iyo PTA-yada,wuxuu ku dhiirigeliyaa iney ka qaybqaataan go'aanada lagu gaadho haba Waalid-Bulsho Ka Wada qaybqaadashada Parent-Community Participation Teams iyo Go'aan Gaadhista Gudiyada loo Dhan yahay Shared-Decision-Making Committees waxaa kale oo ay fududeysaa ka qaybgalka waalidka ee machadada tababarka hogaaminta
- **Xarumaha Waxbarashada Dadweynaha** waxay bixiyaan koorsooyin kombuyuutar oo 16-wiig ah kaas oo ku baxa afka isbaanishka iyadoo la isticmaalayo internetka. Barnaamijkan waxaa qaata waalidiinta Hisbaaniga ah waxaana siiya machadka Mexican Institute of Greater Houston.

Wixii faahfaahin ah eek u sahabsan ka qaybqaadashada hawlaha waxbarasho ee ilmahaaga waxaa kuu sharixi doona maamulaha iskuulkaaga marka aad joogto iskuulka iyo marka aag gurigaaga joogtaba. Wixii war intaa dheer eek u aadan mutadawacnimada waalidka iyo ka qaybgalkooda hawlaha boga internet-ka www.houstonisd.org/parentengagement )

**Habab kale oo Waalidku Wax-u-tari karo (Other Ways in which Parents can Help):**

***Tus ilmaha in dabeecadaha la barto*** u noqo tusaale ilmahaaga.Wax akhriso, ka shaqeeyo duruus,dhegayso talooyinka dadka kale ee khibrada leh

***Maalin walba wax akhri*** U akhri caruurtaada ilaa inta ay ku jiraan kindargaardhanka siina wad wax u akhrinta caruurta xataa kadib marka ay noqdaan kuwo ku fiican wax akhriska

***Kula soco ilmaha guriga iyo dugsigaba*** .La sheekayso dhagaysana waxa caruurtu ku leeyihiin. Iskuulka la xidhiidha adigoo la hadlaya maamulaha una soo jeedi talooyin ku aadan sida loo caawin karo ilmaha.

***Ka warhay horumarka caruurtaadu samaynayso.*** Ku amaan dedaalkooda had iyo jeer una fooladee marka ay shaqo fiican qabtaan. Abaabul kulan qoys oo ujeedadiisu tahay dhiirigelin ilmaha marka uu natiijo fiican keeno.

***Taageer caruurta marka ay qalad sameeyaan.*** Hogaamintaada muuji marka ilmahaagu dhaco.

***Tixgeli goaanka ilmahaaga.*** Ku garab istaag ilmahaagu go'aanada uu gaadho.Kana caawi iney fuliyaan go'aankooda.

***Baro manhajka ilmahaaga.*** Waqti ku bixi inaad barato manhajka maado walba.Ka qaybgal aqoon korodhsiyada iyo tababarada waalidka.

***Kuu dhiirigeli caruurtaada iney ku daydaan dhaqamada wanaagsan.*** ku adkow akhlaaqdooda marka ay idin dhexmaraan arimo taabanaya edebka , cadaalada , iyo sinaanta.

***Raadi macalin-guri  karti leh*** .Hadii ay lagama maarmaan noqoto soo hel macalin-guri .Raadso qof ilmahaaga garaadkiisa kobcin kara.

***Xusuusnow inaad u samaysato  jadwal maalinle ah.*** Ku bilow jadwal taabanaya dhinacyada waqtiyada cayaarta,hawlaha,layliska,arimaha qoyska iyo waqti seexasho.Waqti ugu talogal caruurtaada inaad ka caawiso layliska dugsiga.Xooga saar iney keenaan dhibco fiican.

***Shaqo-gurigu*** wuxuu xoojiyaa fahanka fasalka macalimiintana wuxuu ka caawiyaa iney qiimeyaan horumarka ardayga.Waxaan waalidiinta ku dhiirigelinaynaa iney ka qaybqaataan shaqo-gurida ayna ku dhiirigeliyaan ilamaha iney dhamaystiraan.

**Mutadawiciinta (Volunteers)**

Sannad walba inka badan 25,000 waalidiin, ururo bulsho, iyo mutadawiciin ganacsadyaal ah ayaa qabta hawlo lagu taageerayo korna lagu qaadayo dugsiyada HISD.Addigan siyaabahan soo socda ayaad uga qayb qaadan kartaa

**1. Waalidiinta:** Xubanaha ka tirsan ururka mutadawiciinta dugsiyada dawliga ah Volunteers in Public School ayaa ku waxay ku taburacaan macalin-guri, hagayaal, kaaliye-yaal macalin, amni-sugayaal, turjumaano, makhaayad kormeerayaal, taageerayaal maktabada, xarumo warbaahino, farmasiilayaal, iyo xaafisyo. Booqo xafiiska Warbixinta Waalidka ama “Parent Information” eek u yaal HISD bogooda internetka ama la hadal Parent Engagement oo tilifoonkoodu yahay (713-556-7206)

**2. Bulsho/Ganacsato:** Dugsiyada HISD waxaa lagu kobciyaa xidhiidho loola sameeyo ganacsiyada,ururada xirfadlayaasha ah,ururada bulshada iyo dawlada,ururada diiniga ah , kulliyadaha iyo jaamacadaha, iyo/ama ururada bulshadda kuwaas oo iskuulka baahiyihiisa wax ka tari kara.Faahfaahin dheeri ah fadlan booqo boga xidhiidhka bulshada www.houstonisd.org/communityrelations ) ama la hadal 713-556-7200

HISD ixtiraam weyn bay u haysaa waalidiinta iyo mutadawiciinta kale.Waxaan ku dhiirigelinaynaa qof kasta oo reer Houston ah inuu ka qayb qaatao dedaalka aan ugu jirno sidii dugsiyadeenu u noqon lahaayeen kuwo ug fiican wadanka.

**Xallinta Mushkiladaha**

HISD aad ayay ugu faraxsan tahay taageerada ay ka hesho waalidiinta ardayda. Shaqaalaha HISD oo dhan waxay la wadaagaan walidiinta hadafka guud ee ah iney lagu guulaysto waxbarida ardayda.Sidaas ay tahay mararka qaar is-fahan waa ayaa iman kara.Si loo helo xal lagu wada qanco , degdegna ah oo laga gaadho mushkilad kasta oo soo korodha waxaa lagama maarmaan ah in la raaco nidaamka iyo kala dambaynta ay dejisatay HISD.Wada hadal aan turxaan lahayn daacadna laga yahay ayaa bud-dhig u ah xalinta mushkiladaha.Haddii aad fahmi weydo amabase aad ku qanci weydo ficil ama

siyaasad iskuul soo rogay oo samayn ku leh ilmahaaga , qofka u horeeya ee aad waajahaysaa waa macalinkiisa.Balan la samayso macallinka si degan oo furana ugala sheekayso.Haddii aad ku qanci weydo halkaa ama arrintaadu tahay mid dugsiga oo dhan ku lugleh si toos arinta ula tag maamulaha oo ah maamulka ugu sareeya dugsiga.Hadiiba ay dhacdo in maamuluhuna furdaamin waayo , talaabada xigtaa waa inaad la xidhiidho kormeeraha jooga xafiiska gobolka ee iskuulkaagu hoos tago. (Dhamaadka buugan waxaa ku lifaaqan liiska lix xafiis goboleed). Faahfaahin dheeri ah u doono Laanta Waalidka Parent Engagement Dept. ee tilifoonkoodu yahay. (713-556-7206)

**Macluumaadka Kulliyadda**

Ardayda muhaajiriinta way tegi karaan kuliyada kasta iyada oo aan loo eegin xaalkood muhaajirnimo. Juun 17-keedii sannadkii 2001 waxaa la saxeexay xeer la yidhaa HB 1403 kaas u ogolanaaya ardayda soo galaytiga ah oo ay ku jiraan kuwo aan la diwaangelin iney helaan waxbarasho gobolka gudihiisa. Sharci kale oo cusub oo la yidhaa SB 1528 ayaa sii balaadhiyey faa'iidada sharciga HB 1403. SB 1528 wuxuu leeyahay waa inuu saxeexaa wacad. Arday si uu u helo fursadan waa inuu:

1) Waa inuu ka qalin-jebiyey dugsi sare oo dawli ama mid gaar loo leeyahay ama uu GED ka qaatay Teksaas

2) Waa inuu degenaa Teksaas 3 sanno ee u dambaysay taas oo keentay inuu ka qalin jebiyo ama uu ka qaatay GED.

3) Waa inuu ku noolaa Teksas l2 bilood oo isku xiga kana horeeyay simistarkii uu is qoray kulliyada.

4) Waa inuu dugsiga keenaa wacad sheegaya inuu codsan doono deganaasho rasmi ah marka arrintaasi sharci noqoto.

**Kulliyadaha Reer Teksaas:** Wax kasta oo uu qofka reer Teksaas uga baahdo taggida kulliyad ama dugsi farsamo: isku diyaarinta, codsashada, iyo lacag bixinta. Gobolka Teksaas wuxuu u sameeyay dhamaan jaamacadaha dawliga ah hal codsi oo lagu dalban karo ku biirida tan oo meesha ka saaraysa baahida dhowr codsi oo la gudbiyo. Foomkan oo la yidhaa ApplyTexas (oo horena loo odhan jiray Texas Common Application) waxaa laga soo nuugi karaa bogga www.applytexas.org

**Codsiga Gargaar Maaliyadeed ee Gobolka Teksaas (Texas Application for State Financial Aid) oo loo gaabsado TAFSA.** Codsiga uu keeno qof Teksas degan oo aan xaq u lahayn gargaarka federaalka waxaa laga heli karaa www.collegefortexans.com/residency/TASFA.doc. Xusuusnow in muwaadiniinta Maraykanka ah iyo dadka haysta degenaasho rasmi ah iyo kuwa qaxootiga ahiba ay xaq u leeyihiin taageerada iyo gargaarka maaliyadeed ee Federaaliga ah.

**Barnaamijka Aqoonyahanka Teksaas. Barnaamijkani** wuxu u diyaarinayaa ardayda iney doortaan waxay xiisaynayaan kadibna jaamacad u galaan. Booqo bogga HISD ee aqoonyahanka Teksaas oo ah http://www.texasscholars.org ama la hadal tilifoonkan 713-556-7200.

Ardayda dugsiga sare waxay heli karayaan qalab ka caawinaya iney darsaan mihnadaha ama xirfadaha kala duwan. "Texas Scholars Interactive Guide to Life after High School." Waa bug kaa caawinaya inaad kala doorato in ka badan 800 oo mihnadood oo kala ah milatariga, ganacsiga iyo farsamoyaqaanka, aart-ka, waxbarashada, tiknoolijiyada, xisaabaadka, maamulka ganacsiga, caafimaadka, Iibgeynta, warshadaynta, gaadiidka, and iyo kuwo kale oo badan. Mihnad kasta, buugani wuxuu muujinayaa mushaharooyinka laga qaato, korodhka shaqooyinka, shaqada, iyo xirfadda iyo aqoonta loo baahan yahay. Waxaa soo raaca in shaqo walba ay ku jirto dariiqada lagu gaadhi karo iyo koorsooyinka ay tahay inuu ardaygu ku qaado dugsiga sare.

**Nolosha Dugsiga Sare Kadib.** Buuga aan kor ku soo sheegnay waxay ardayda dugsiga sare ku helayaan bilaash; waxa keliya ee loo baahan yahay waa magacaaga iyo kan dugsigaaga. Si aad u gasho Bogan internet-ka ah booqo bogooda
Http/www: texasscholars.lifeafterhighschool.org

**Mashruuca GRAD** (Graduation Really Achieves Dreams) waa dedaal loo ay isugu yimaadeen bulshada iyo HISD si looga caawiyo caruurta danyarta ah iney dhamaystaan dugsiga sare isla markaan ay ugu gudbaan kulliyad. Falsafada ka dambaysa mashruucan waxaa weeyi in ardayda dhigat PK ilaa fasalka 12aad ay noqon karaan arday fiican oo asalkoodu iyo halka ay ka soo jeedaan ayna saamayn lahayn. Booqo bogga mashruucan ee www.projectgradhouston.org.

## CAAFIMADKA, SHARCIGA IYO MA-HURAAN KALE

**Arimaha Caafimaadka iyo Badbaadsanaanta**

Caafimaadqabka iyo badbaadsanaanta ilmahaagu waxay u fiican waxbarashadiisa.

- Nafaqo iyo cunto wanaagsan oo ilmahaagu quutaa waxay muhim u tahay waxbarashadiisa/eeda dugsiga. Daraasado badan oo la sameeyay ayaa waxay sheegayaan in caruurta si fiican u soo qureecataa ay keenan imtixaanada derejo fiican. Ka ilaali ilmuhu inuu cuno qureecda nacnac iyo macmacaan kale. Ku qureecsii ilmaha qureec booratiin badan leh. Haddii ilmuhu aanu jeclayn raashinka qureecda waa iska caadi inaad siiso wixii ka yaala cashada xalay ama waxaa la siin karaa saanwayj.
- Haddii ilmuhu yeesho xumad (100 digrii ama ka badan), fadlan ku u ogolow inuu/iney guriga iska joogo si loo daweeyo.
- Sharci gobolka ka jira ayaa khasbaya in ilmaha ka yar laba sano lagu ilaaliyo kursi gaadhi la ansixiyey.Caruurta u dhaxaysa laba ilaa afar way in lagu fadhiisiyaa kursi la ansixiyey ama waa in loo xidhaa beelka (kursiga hore ama ka dambe)
- Sharciga gobolku wuxuu ka madnuucay qof kasta oo ka yar da'da laba iyo toban inuu buudhiga ama dusha sare ee gaadh xaajiyad ah. Haddii ay daruuri noqoto in

ilmo la fuushiyey buudhiga sare ama dusha gaadhi xaajiyad ah waa in markaa xawaaraha ya ku soconaysaa ka badan 35 mayl saacadiiba.

**Adeegyadda Caafimaad**

Qof walba, iyadoo oo aan loo eegin xaalkooda muhaajirnimo, waxay helaysaa adeeg caafimaad, talaal, baadhis iyo ka daawayn cudurada. Qaybta Adeega Bulshada ee Laanta Caafimaadka ee Houston (**City of Houston's Health Department)** waxay bixisaa daryeel caafimaad oo ay siiso qaxootiga.

Waxaa kale oo la fidiyaa adeegyadan soo socda iyadda oo aan la eegin qofka xaaladiisa muhaajirnimo:

- Tallaalka caruurta
- Baadhista Qaaxada (TB) iyo Aydhiska (AIDS)
- Daryeelka hooyada xaamilada ah
- Daawaynta cudurada galmada lagu kala qaado
- Daryeelka iyo daawaynta ilkaha caruurta da'doodu ka yar tahay 18
- Ka warhaynta caruurta da'doodu ka yar tahay 18-ka sanno.

**Laanta Caafimaadku waxay leedahay sideed kiliinik**:

| | | |
|---|---|---|
| **La Nueva Casa** | 1809 N. Main | 713-547-8000 |
| **Lyons Clinic** | 5602 Lyons | 713-671-3000 |
| **Magnolia Clinic** | 7037 Capitol | 713-928-9800 |
| **Northside Clinic** | 8523 Arkansas | 713-696-5900 |
| **Riverside Clinic** | 3315 Delano | 713-831-9600 |
| **Southwest Clinic** | 6441 High Star | 713-779-6400 |
| **Sunnyside Clinic** | 9314 Cullen | 713-732-5000 |
| **HoustonWest End Clinic** | 190 Heights Blvd. | 713-866-4100 |

**Waalidnimada Qorshaysan (Planned Parenthood)** waa hay'add dumarka u sameeysa daawayn ka hor tag ah, macluumaad ku sahabsan yaraynta dhalmada, baadhista naasaha, and talo-siinta waalidka iyo adeegyad xaamilada. Sidoo kale waxay sameeyaan ilmo ka sifayn, dhalmo ka yarayn, iyo ekasryada lagu baadho kansarka naasaha oo qiimo jaban ah looguna talogalay dumarka danyarta ah ee da'doodu ka wayn tahay 50 jir. Waxay ku weydiin, balse khasab maaha inaad leedahay Sooshiyal Sukuyuuriti Nambar (social security number). Hoos waxaa ku qoran liiska kiliinigyadooda:

| | | |
|---|---|---|
| **Fannin*** | **3601 Fannin** | **713-522-3976** |
| Casa de Amigos | 1615 N. Main | 713-222-2272 |
| Dickinson, TX | 3315 Gulf Freeway | 281-337-4618 |
| Greenspoint | 11834 Airline | 281-820-5305 |
| Rosenberg, TX | 4203 Avenue H # 7 | 281-342-8408 |
| Stafford, TX | 3727 Greenbriar | 281-494-5757 |
| Southwest | 6121 Hillcroft, # O | 713-541-5372 |
| 1960 Office | 3995 FM 1960 W | 281-587-8081 |

* Kiliinigyada Baarant huudh (Parenthood) ee Fanin ayaa ah kan ugu wayn degaanka Huoston.Halkaa waxaad ka helaysaa adeeg farmasi oo jaban ama bilaash looguna talogalay dhowr iyo toban jirrada.Fiirso bogooda internet-ka http://www.pphouston.org/site/PageServer

**City of Houston-Sunnyside Health Center**
**9314 Cullen Boulevard, Houston, TX 77051**
**713-732-5000**

Xaruntan waxaa laga helayaa adeeg caafimaad oo adeeg caafimaad dadwayne oo si gaara diirada u saaraya dumarka iyo caruurta. Xaruntu waxay furan tahay Isniinta ilaa Jimacha saacadaha 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. Medicaid oo ah adeeg dawladu ugu talo gashay dadk danyarta ah oo leh bukaansocod iyo jiifba waa la ogol yahay. Xaruntan waxaa kale oo laga helayaa adeegyada qorshaynta qoyska, baadhista uurka, adeegyada hooyada, caafimadka caruurta, talaalka, cabirka dhiigkarka, ka baadhisata qaaxada ee maqaarka, farmasi ilkaha, caafimaadka hooyada uurka leh, iyo aqoonta caafimaadka.

**Sunnyside WIC (Women, Infants & Children)**
**4605 Wilmington, Houston, TX 77051**.
**713-732-5050**

WIC waa barnaamij kaas oo qiimeeya xaalada umusha kadib, naas-nuujinta, hooyada sidda, caruurta ka yar 5 sano iyo xaalada dhaqaale iyo nafaqo ee ilmaha si loo qiimeeyo inuu ilmuhu inuu helayo waxbarashada nafaqada ee ay maalgeliso federaalku, kabaayaasha cuntada iyo talaalka.

Hooyooyinka aan diwaangashanayn way ka qaybgeli karaan adeegyada WIC balse taasi waxay ku xidhan tahay iney yihiin danyar. **Barnaamijkani cidna u sheegi maayo xaalada muhaajirnimo ee caruurta ama waalidiinta.**Wixii war intaa dheer kala xidhiidh 713-794-9090 .Dhamaan xarumah WIC waxaad ka helaysaa shaqaale ku hadla laba laba af ee luuqadahan :Boosniyaan/Seerbiyiin-kuruwaat , Isbaanish,Ruush iyo fiitnaamiis.

**Legacy Clinic**
**215 Westheimer- Houston, TX 77006 - 713-830-3000**
**3311 Richmond, Suite 100 - 713-830-3033**
**www.legacycommunityhealth.org**

Kiliiniga la yidhaa Legacy Community Health Services wuxuu bixiyaa adeeg bilaash ah oo uu siiyo dadka Aydhiska iyo baadhitaan heersare ah oo ku aadan maqalka qofka.

**AIDS Foundation Houston, Inc**
**3202 Weslayan Annex, Houston, TX 77027**
**713-623-6796**
**info@AFHouston.org**

Waa urur bulsho oo bixiya taageero iyo Legacy Community Health Services macluumaad wax ka taraya HIV/AIDS.

**Goobaha caafimaad ee dugsiga**

Ujeedada goobahan caafimaad ee dugsigu waa in la horumariyo xaalada caafimaad ee ardayda si loo yareeyo habsanka ka dhasha xanuun ku yimaad ardayga. Waa barnaamij ay wadajir u fuliyaan hay'addo caafimaad oo dhowr ah oo isugu jira kuwo dawli ah iyo kuwo gaar loo leeyahay kuwaas oo iyaga oo la shaqaynaya dhistariga abuura goobo caafimaad oo dugsiga ku yaal si ay daawayn iyo daryeel caafimaad oo bilaash ah u siiyaan ardayda HISD.Inkastoo goobtii u horeysay ee caafimaad ee ku taal dugsi dhexdii la sameeyay 20 sannadood ka hor hadana waxay soo bateen 5-tii sano ee u dambaysay. HISD waxay xidhiidh shaqo la leedahay 25 hay'adood oo caafimaad kuwaas o isugu jira kuwo wareega iyo qaar ma guuraan ah una shaqeeya in ka badan 85,000 oo arday. Goobahan waxay sameeyaan baadhis caafimaad, daryeel guud oo ka hortag ah, waxbarasho, talaal, jugaha, maaraynta xanuunada raaga, daryeelka xanuunad ku soo boodada ah, caafimaadka taranka, iyo daryeelka caruurta. Barnaamijyada qaar baa bixiya daryeelka caafimaadka ilkaha, maskaxda iyo adeegyo bulso oo kale. La xidhiidh dugsiga kuugu dhow si aad u hesho goobta caafimaad ee dugsi ee kuugu dhow.

**Dumarka Lagu-Xadgubo (ama la-garaaco)**

Dhibanayaasha iyo guriga wax lagu yeelo, dumarka la kufsado ama la garaaco waxay xaq u leeyihiin iney la hadlaan boliiska iyaga oo aan ka cabsanayn in la mastaafuriyo. Booliiska ayaa balan qaaday inuu si ugu wada shaqayn doono dadka isaga oo aan u eegin sharcinimida muhaarjirnimadooda.

**Aids to Victims of Domestic Abuse (AVDA)**
**1001 Texas, Suite 600,**
**Houston, TX 77002**
**713-224-9911**
**http://www.avda-tx.org**

Hay'adan AVDA waxay leedahay Mashruuc u Doodid Sharci "Legal Advocacy Project" kaas oo qabta siminaaro ku sahabsan mushkiladaha ka dhaca qoyska dhexdiisa iyo nidaamka cadaalada iyo waliba metelaada xaga sharciga ah oo arrimaha qoyska ah.AVDA waxa kale oo ay wadaa mashruuc la yidhaa "Pivot Project" oo wax laga qabto raga rabshada badan , hagaardaamadaana leh iyo kuwa doona iney masuuliyad iska saran hagardaamoyin mucayin ah.Siddoo kale hay,addu waxay talooyin siisaa dadka ay waxyeelooba rabsahadaha ka dhaca qoyska dhexdiisa.Barnaamijkan waxaa weheliya barnaamija wareega oo ah xidhiidhka bulshada iyo aqoon isweydarsi.

**Houston Area Women's Center (HAWC)**
**1010 Waugh**
**Houston, TX 77019**
**Sexual Assault Hotline 713-528-7273**
**Domestic Violence Hotline 713-528-2121**
**http://www.hawc.org/site/PageServer?pagename=splash**

Xaruntani waxay u wax u qabataa dadka ay la kulanto waxyeelo jinsi ah iyo dhibaato qoys. Lambar lala hadli karo mar walba ee wax-ka-qabanaya kufsiga waa 713-528-7273. Hay'addan waxay ka taageertaa haweenka lagu xadgudbo dhinacyada macluumad ku sahabsan guriyeynta iyo sharciga, caafimaadka iyo fursadaha shaqo. Dhamaan adeegyadaas oo dhani waa bilaasha, fiidkii haddii aad rabto in laguu shaqeeyo waa inaad balan sii samaysataa.

Adeegyada hay'adda HAWC waa u furan yihiin qof walba loona eegi mayo xaaladooda muhaajirnimo. Wax waraaqo ah lagaagama baahna

**Sharciga iyo adeegyada kale**

Hay'adaha soo socdaa waxay diyaar u yihiin muhaajiriinta jecel in loo dood isla markaana aan haysan aduun ku filan oo ay iska bixiyaan kharashka garyaqaanka. Qiimayaasha kuma jirto $ 250 doolar ee ah fiida la siinayo hay'adda Immigration and Naturalization Service (INS) ee ay ku qaadayso faraha kuuguna samaynasyo codsiga muwaadinimada.

**The Association for the Advancement of Mexican Americans (AAMA)**
**6001 Gulf Freeway, B3**
**Houston, TX 77023**
**713-926-4756**
**http://www.aamainc.us**

Ka sokow hawlaha ay u qabato bulsahadeeda, hay'addani waxay bixisaa casharo ku sahabsan muwaadinimada lana qaado $ 10 doolar saddexdii bilood. Casharadda waxaa la dhigtaa laga bilaabo Isniinta-Khamiista inta u dhexaysa 9:00 subaxnimo ilaa 1:00 duhurnimo.Duruusta la qaadanayo waxaa ka mid ah fahanka luuqada ingiriiska iyo fahanka taariikhda iyo dawlada maraykanka.

AAMA waxay waddaa toban barnaamij oo isugu jira : Fasalo Ingiriis, GED loogu talo galay dhalinyarta iyo dadka waaweyn ee aan dhamaysan waxbarashada , daawayn guriga ah ee dadka isticmaala mukhadaradka , iyo koorsooyin ku sahabsan aqoonta aydhiska.Barnaamijkooda horumarinta bulshadu wuxuu xaga kirada ka caawiyaa dadka ku nool xuduudaha furayaasha 77011 iyo 77012.Barnaamijkooda waxbarsho wuxuu ka caawiyaa dadka ay la shaqeeyaan iney doortaan xirfad , kooras ay bartaan iyo dugsi.

Siddo kale waxay ka caawiyaan in dadkani helaan taageero maaliyadeed.

**GANO / CARECEN—Central American Refugee Center**
**6006 Bellaire Blvd., Suite 100**
**Houston, Texas 77081**
**713-665-1284**

Hay'adda GANO/CARECEN waxay bixisaa taageero sharci taas oo ay ka mid tahay ka taageerid buuxbuuxinta codsiyada muwaadinimo iyo sida loo helo ogolaansho shaqo. Ururku wuxuu hayaa gobo shaqo halkaas dadku ka heli karaan shaqo maalinle ah. Siddo kale waxay bixiyaan fasalo waalidnimada lagu barto oo ay siiyaan dumark. Waxa kale oo bixiya casharo ingiriisi ah iyo qoraalka iyo akhriska isbaanishka dadka aan doonayn inay codsadaan muwaadinimo.

**Associated Catholic Charities**
**2900 Louisiana, Houston, Texas 77006,**
**713-526-4611**

**http://www.catholiccharities.org**

Qaybta soo galaytiga iyo qaxootiga ee haydani waxay bixisaa taageero iyo rajo ay u abuurto qaxootiga iyo soo-galaytiga.

**Dib-Udejinta Qaxootiga-Dib-U-Midaynta Qoyska**

Adeegyada ay ka midka yihiin wacyigelinta dhaqanka, abuurista shaqooyin,dib-u-midaynta qoyska kuwaas oo ka caawiya qaxootiga dawladu qaabisha iney isku-filnaadaan.Adeegyadan waxaa loogu talo galay dadka waaweyn iyo qaxootiga saska ka qaaday is-xambaarkii ay ku yimaadeen

**Bilton, Dwayne - Lonestar Legal Aid**
**1415 Fannin St., FL 3**
**Houston, TX 77002**
**713-652-0077**
**http://www.lonestarlegal.org**

Hay'addani waxay waxay taageero sharci siisaa dadka danyarta ah.si aad u hesho adeegooda bilaashka waa inaad la hadashaa si go'aan looga gaadho inaad u qalantid iyo in kale.Waxaa wax lagaa waydiin doonaa dakhligaaga iyo arintaada.Keliya waxaa la aqbalayaa kiisaska madaniga ah.Dadk ku degan sifada sharciga iyo kuwa aan diwaangashanaynba xaq bay u leeyihiin iney helaan adeegyadan haddii kiiskooda u soo galayo ilmo sida marka furniin dhaco oo kale ama marka ay jiraan mushkilada daryeelka ah.Arrimaha kale waxa ka mid ah dhibta ka dhex dhacda mulkiilaha iyo qofka guri kiro ugu jira , aqal ka xidhashada,helida sooshiyal sukuyuuriti nambar , magdhowga shaqo la'aanta, raashinka, caafimaadka.Hay'adani waxay ku adeegtaa af isbaanish iyo af fiitnamiis labada.

**Houston Volunteer Lawyers Program**
**712 Main, Suite 2700**
**Houston, TX 77002**
**713-228-0735**
**info@hvlp.org**

Hay'addani waxay bixisaa taageero sharci oo bilaash ah looguna talogalya dadka dhaqaalahoodu aadka u hooseeyo ee aan awoodi Karin iney kiraystaan garyaqaan.Haddii aad hesho adeegan waxaa keliya oo aad iska bixinaysaa kharashka furashada galka dacwadaada.Furniinka, gacan-ku-haynta caruurta iyo dhibta dhex marta mulkiile iyo kirayste guri ayaa ah mushkiladaha ay xaliyaan.

**Immigration Counseling Center, Inc.**
**6430 Richmond Ave., Suite 450**
**Houston, Texas 77057**
**713-953-1605**

Xaruntani waxay bixisaa talooyin ku sahabsan muhaajirnimada iyo taageero la siiyo soo galaytiga u baahan iney diyaarsadaan kiiskooda ay ula tagayaan hay'adda socdaalka ee Immigration and Naturalization Service (INS).Si aad wax lagaala qabto codsigaaga muwaadinimo waxaad bixinaysaa $ 50 doolar.Addeegyada kale ee aan ahayn codsiga muwaadinimada xooga baa ku kordhaya kharajka.

**Immigration Resource Center**
**The Family Road Program**
**Christus-Southwest Community Health Center, 6441 High Star**
**Houston, Texas 77074**
**713-779-6400**

Xaruntani waxay wax la qabataa dadka u baahan macluumad iyo taageero ku sahabsan muhaajirnimada iyo arimaha sharciga iyo waliba qabatinka nolosha cusub ee ameerika.

Xaruntani waxay ku siinaysaa xog muhim iyo doorarka u furan qofka soo haajiray si ruuxu u gaadho go'aano xaqaa'iq ku dhisan oo noloshiisa ah. Waxaa soo raaca iney qabtaan kulan bileedyo si bulshada looga caawiyo iney fahmaan isbedelka ku dhacay sharciyada muhaajiriinta iyo daryeelka iyo saamaynta ay ku yeelanayaan bulshada.

Iyaddo ka faa'iidaysanaysa xidhiidhka ay la leedahay cisbitaalka St. Joseph Hospital ayaa hay'addani waxay samaysaa talaal, baadhis qaaxada iyo aydhiska ah, daryeelka hooyada uurka leh, daawaynta cudurada galmada lagu kala qaado,daryeelka caafimaadka ilkaha ee caruurta ee da'doodu tahay ilaa 18 jir iyo ka warhaynta caruurta xilliga ay dhashaan ilaa 5 jirkooda.Waxaa kuu raaca oo SCHC ay u saamaxdaa in bukaanku helaan adeeg dadwayne iyo caafimaad bilaash ah , barnaamijyada WIC iyo "Life Houston".

Xaruntu waxay fulisaa barnaamij kale oo daryeel kaas oo bixiya casharo wax qoris iyo wax-akhris iyo kuwo nafaqaynta ah. Isagoo kaashanaya ururada kale ee bulshada, barnaamijkani wuxuu wuxuu ka caawiyaa qoysaska dhinacyada caafimadka, korniinka caruurta, waxbarashada, shaqaalaynta, maaliyada, nafaqada iyo helida khayraadka kale ee bulshada. Wax kale oo ay leeyihin Xarun Wax Akhris-Qoris taas oo bixisa casharo ku sahabsan xirfadaha qorista iyo akhriska luuqada ingiriska oo afar heer ah .

**YMCA International Services**
**6300 Westpark, Suite 600**
**Houston, Texas 77057**
**713-339-9015**
**http://www.ymcahouston.org**

Barnaamijka Houston Refugee Pro Bono wuxuu taageeraa dadk raadinay magangelyo siyaasadeed kan kale Crime Victims Civil Legal services wuxuu siiyaa adeeg sharci dhibanayaasha.Talooyin guud ayaa la bixiyaa arbaco kasta bilaa balan inta u dhaxaysa 9 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.

**Law Clinic-University of Houston**
**100 Law Center**

**Houston, TX 77204**
**713-743-2094**

Xaruntan sharci waxay bixisaa taageero dadka kaca , gacan ku haynta caruurta, iyo kiisask muhaajiriinta.Taageero laba luuqadood ah ayaa lagu bixiyaa isbaanish adeegana waxaa loogu talo galay oo keliya muhaajiriinta aan diiwaangashanayn waana in balani jirtaa.

**Houston Works USA**
**2118 Smith**
**Houston, TX 77002**
**713-654-1919**
**http://www.houstonworks.org**

Houston Works waa hay'ada ka caawisa ardaydu iney helaan shaqooyin xagaagii. Ardaydu waxay waa iney keenaan walxaha hoos ku qoran si ay u codsadaan shaqo iyagoo sii maraya Houston Works:

- Waraaqda dhalashad oo asal(original) ah ama kaadh degnaansaha sharciga ah
- Kaadhka Daryeelka (Social Secuirity Card)
- Kaadhka warbixinta ama aqoonisga Teksaas (Texas ID)
- Proof of 26 weeks of family income (10-15 check stubs)
- Cadayn 26 wiig oo dakhli qoys ah (dabada 10-15 jeeg)

**St. Joseph's Catholic Church**
**1505 Kane St.**
**Houston, TX 77007**
**713-222-6193 Parish Main, 713-222-8903 Social Ministry**

Kiniisadani waxay shaqooyin ah jaariyadnimo, sheekhadnimo, ama xanaanaynta dadka waaweyn. Waxa kale oo ay sameeyaan quudin dadka ku nool agagaarkeeda. Markii muddo la joogaba mar ayay abaabushaa cabirka dhiigkarka oo bilaash ah , baadhid sonkorowga ama macaanka, hargabka.Sidoo kale kaniisadani waxay kaa caawin kartaa codsigaaga aad ku doonayso caydha ama daryeelka , kaadhka daynta ama waraaqaha dawladu bixiso ee lagu gato cuntada

**Texas Workforce Commission**
**2613 Austin**
**Houston, TX 77002**
**281-983-1100**
**http://www.twc.state.tx.us**

Hay'adda Texas Workforce Commission waxay kuu diyaarisay xog ururiye (database) shaqooyinka ah. Iyaddoo la eegayo mushahaarkaaga ayaa waxaad xaq u yeelan kartaa tabobarad la bixiyo. Siddo kale waxaad u ga can banan tahay kombuyuutarada si aad u qorto CV-gaaga ama internetka aad shaqo uga raadsato. Mishiinada koobiga iyo faakisyo ayuu kuugu diyaar ah. Hay'addani siddo kale waxay kaa caawineysaa haddii aad dood ka qabto daryeelka loogu talo galay dadk aan shaqayn.

**Alliance for Multicultural Community Services, "The Alliance"**
**6440 Hillcroft, Suite 411**
**Houston, Texas 77081**
**713-776-4700**
**http://www.allianceontheweb.org**

Ururkan "The Alliance" wuxuu bixiyaa shaqooyin, muwaadinimo iyo taageero guri siin ah iyo weliba casharo Ingiriisi ah oo lacag la'aan ah. Barnaamijyada kale waxaa ka mid ah tababarka xirfadaha lagu shaqaysto/Adeegyada shaqsiinta, dib-u-dejinta qaxootiga, tababarka luuqada ingiriiska, la-talinta muhaajiriinta. Dadka ay u adeegaan waxaa ka mid ah Itoobiyaan, Kaamoodhiyin, loatiyiin, Fiitnaamiis.Qoraaladooda waxaa lagu heli karaa luuqadaha Bosniyan/Serbi-kuruwaat, Jayniis, Soomali, Isbaanish iyo Fiitnaamiis.

**Council on Alcohol and Drugs**
**303 Jackson Hill St.**
**Houston, TX 77007**
**713-942-4100**
**http://www.council-houston.org/Public/index.asp**

Hay'adan bulsho waxay leedahay barnaamij adeeg oo loogu talo-galay dadka mukhaadaraadka isticmaala. Barnaamijkani wuxuu la shaqeeyaa hay'adaha kale ee caafimaadka. Dadka isticmaala mukhaadaraadka iyo qoysaskooda waxaa diyaar u ah la-taliye laba af ku hadla kaas oo siiyo tabobaro iyo kulano aqooneed.

**Community Family Center**
**7524 Avenue E Houston, TX 77012 - 713-923-2316**
**7305 Navigation Blvd., Houston, TX - 713-926-2601**
**6605 Rookin St., Houston, TX - 713-774-4657**

Xaruntani waxay bixisaa talooyin ay siiso qoyska iyo qofka mukhaabaraadka isticmaalaba. Xaruntu waxay la shaqaysaa kiliiniga Mangooliya dadka ay u adeegtana waxaa loo sameeyaa aqoonsi (ID) ama sooshiyal sukuyuuriti kaadh si ay u helaan adeegyada WIC, ama dibloomada dawladu siiso dadka aan dhamaysan dugsiga sare balse ka gudba imtixaan dawladu qaado ee loo yaqaan GED.

**El Centro de Corazón**
**5001 Navigation**
**Houston, Texas 77011**
**713-926-1849**

Haddii aad ku nooshahay xuduudaha furayaashan 77003, 77011, 77020 iyo 77023, waxaad helaysaa adeegyada ay bixiso hay'adani. Adeegyada la bixiyaa waa: Taageerada qoyska, Talo-bixin, daawaynta xanuunada maskaxda iyaddo la isticmaalayo falanqaynta mushkiladaha, kooxaha taageera dumarka, barnaamij muusiko ah ee caruurta ka yar 4 jir, barnaamijyo ka hortaga mushkiladaha qoyska ka dhex dhaca, casharo kombuyuutarka iyo xirfadaha shaqada ah iyo kuwo kale.

**Neighborhood Centers Inc.**
**4500 Bissonnet, Suite 200**
**Bellaire, TX 77401**
**713-667-9400**
**http://www.neighborhood-centers.org**

Hay'addani waxay bixisaa adeegyo kala duwan. Si aad u isticmaali karto adeegyadan, waa in mushaharkaagu ka hooseeyaa qadar ay goysay hay'adani. Si aad u hesho baddi adeegyada u baahnid inaad sidato aqoonsi ama sooshiyal sukuyuriti nambar. Hasa ahaatee, barnaamijyada ay maalgaaliso dawlada federaalku waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo sooshiyal sukuyuriti nambar.

Adeegyada hay'addu bixiso waxaa ka mid ah: korniinka caruurta, daryeelka caruurta, caafimaadka iyo nafaqada caruurta iyo qoysaskooda, daryeelka ilkaha, shaqasiinta dhalinyarta ee xagaaga, barnaamijka waayeelka, hu'ga, raashinka iyo agabka dugsiga iyo ka caawinta biilalka laydhka.

**Maanka Ku Hay**

Haddii aanad ka war qabin siyaasada hay'adaha dawliga ka leeyihiin u adeegida muhaajiriinta aan la diiwangelin, **wac ka hor intaanad u tagin.** Sharcigu wuxuu xusayaa in hay'adaha aan macaash doonka ahayni aysan xaq u lahayn iney u soo sheegaan hay'adda socdaalka ee INS (Immigration and Naturalization Service) muhaajiriin bilaa waraaqa ah. Taa macnaheedu waxaa weeyi in hay'adaha aan macaash doonka ahayn ay inta badan siiyaan adeegyo soo-galaytiga aan waraaqaha lahayn.

Ka taxadir haddii aad codsanayso barnaamijyada ay ka midka yihiin Kabka Dakhliga (Supplementary Income). Isbedel lagu sameeyay sharciga caydha/daryeelka (Welfare law 1996) aaya u diiday muhajiriin badan oo sharci ah iney helaan adeega barnaamijyada "cash welfare" ama "long-term care" oo lacag toos ah siiya muhajiriinta. Waxaad wax u dhimi kartaa ama hantaaqi kartaa sharcinimada muhaajirnimadaada haddii aad ka qayb gasho daryeeladan aan laguu ogolayn. Hasa ahaatee isticmaalka barnaamiyadani kaa hortagi mayaan inaad maal-geliso ama "Sponsor-garayso" qof qaraabadada ah.

Haddii aad doonaysoo inaad wax ka ogaato barnaamijka muhaajiriinta ee HISD fadlan la xidhiidh xafiiska Barnaamijka Afafka badan ee Multilingual Program tilifoonkiisuna yahay 713-556-6961.Waaxdani waxay leedahay barnaamij la yidhaa Migrant Program.Haddii aad doonayso war dheeri oo ku aadan barnaamijkan ah fadlan la xidhiidh 713-802-4646.

## *HISD Useful Telephone Numbers*

| | | | |
|---|---|---|---|
| Administration Switchboard | 713-556-6000 | Wararka | 713-556-6005 |
| Advanced Academics (Gifted/Talented) | 713-556-6906 | Maktabada | 713-861-1204 |
| Athletics | 713-556-6913 | Barnaamijka Magned | 713-556-6947 |
| Attendance Boundaries & Transfers | 713-556-6734 | Barnaamijka Afafka Badan | 713-556-6961 |
| Board of Education/Board Services | 713-556-6121 | Ka qayb-gelinta Waalidka | 713-556-7200 |
| Buses (Transportation) | 713-676-9218 | | |
| Business/School Partnerships | 713-556-7200 | Waaxda Boliiska (HISD)XAALADAHA DEGDEGA AH | 713-892-7777 |
| Career and Technology Education | 713-556-6981 | Kuwa aan degdega ahayn | 713-641-7433 |
| Charter and Alternative Schools | 713-807-5181 | Laanta Akhriska | 713-556-6823 |
| Closing of Schools (Weather Hotline) | 713-267-1704 | Maamulka Dugsiga | 713-556-6800 |
| Curriculum | 713-556-6823 | Waxbarashadda Gaarka ah | 713-556-7025 |
| Drop-Out Prevention | 713-556-7017 | Qiimaynta Ardayga | 713-349-7460 |
| Drug-Free Schools and Communities | 713-556-7020 | | |
| Early Childhood | 713-556-6882 | Xafiiska Kormeeraha | 713-556-6300 |
| Federal and State Compliance (student data) | 713-556-6731 | Xafiiska Cashuurta | 832-485-3000 |
| Food Services | 713-225-4617 | Layn-ka (ardayda | 713-641-7446 |
| Counseling and Guidance | 713-556-7019 | Transcripts | 713-556-6731 |
| Health and Medical Services | 713-349-7423 | Mutadawiciinta/Waalidiinta | 713-556-7200 |

| Xafiisyada Gobollada | Tilifoono |
|---|---|
| **JAARTAR ISKUULKA IYO AALTEERNATIVE-K**<br>3200 Rosedale<br>Houston, TX 77004-6297 | Tel: 713-807-5181<br>Fax: 713-807-5172 |
| **GOBOLKA BADHTAMAHA**<br>812 West 28th Street<br>Houston, TX 77008-1710 | Tel: 713-293-9700<br>Fax: 713-802-4620 |
| **GOBOLKA BARIGA**<br>1102 Telephone<br>Houston, TX 77023-3126 | Tel: 713-923-8597<br>Fax: 713-967-5222 |
| **GOBOLKA WAQOOYIGA**<br>5426 Calvacade<br>Houston, TX 77026-4023 | Tel: 713-671-4530<br>Fax: 713-671-4549 |
| **GOBOLKA KOONFURTA**<br>4040 W. Fuqua<br>Houston, TX 77045-6307 | Tel: 713-434-4700<br>Fax: 713-434-4714 |
| **GOBOLKA GALBEEDKA**<br>5827 Chimney Rock<br>Houston, TX 77081-2714 | Tel: 713-662-2142<br>Fax: 713-349-7415 |

**Wararka Tilifeshanka HISD**
**Xafiiska Warbaahinta Waxbarashada: 713-556-6066**

TV-ga HISD waxaa laga daawan karaa Houston 24-ka saac kanaalada kala ah: Time-Warner cable channel 18; Phonoscope channel 76; TV Max channel 96; Cebridge channel 18. Jadwal dhamaystiran oo ah barnaamijyada iyo warar kale waxaad ka heli kartaa http://dept.houstonisd.org/Media).

Barnaamijyada ardayda loogu talagalay waxaa ka mid ah includes *Science/Fiction, After-School Algebra Show (*waa barnaamij su'aal toos ah ay ardaydu soo weydiiyaan barnamijka toosna loogag jawaabo) iyo (barnaamij bilaash ah oo soo daaya caruurta HISD ee sida fiican u nool). Barnaamij kale oo cusub oo la hadla waalidka iyo caruurta oo la yidhaa, *End-of-the-Day Gourmet* kana hadla sida loo diyaaro si dhakhso ah cunto booratiin leh hawadana soo gala khamiista 7:00 fiidnimo

Barnaamijka *HISD News Today wuxu*u soo daayaa wararka HISD maalin walba 6:30 fiidnimo. Waxaa markale lagu soo celiyaa warka 8:30 fiidnimo iyo 8:00 subaxnimo iyo duhurka maalinta xigta. Barnaamijka todobaadlaha waxaa la soo daayaa sabtida 5:30 subaxnimo waxaanu ka baxaa On PAX-TV channel 49 (KPXB_TV Warner Cable channel 7).

Si dadwynaha looga haqabtiro wararka dhistariga iyo arimaha taagan, qaybta "Media Services Television" waxay soo daysaa barnaamijyo ay ka mid yihin *HISD Perspectives*, *Reporte de HISD (*oo isbaanish ah), *HISD Profile, Beliefs and Visions* (oo uu Marti loo yahay gudoomiyaha gudidu) iyo *A Conversation with Dr. Saavedra. Parents in Action* (oo sidoo kale ku baxa isbaanish) ayaa waxa si qotodheer uga hadlaan arimaha ay muhim tahay in waalidku ka qaybqaato. Barnaamijyada *HISD Perspectives* and *Reporte de HISD* waxaa sidoo kale soo daaya HUHT - TV channel 8.

**Wargeyska *HISD Today***

**Xafiiska Xidhiidhka: 713-556-6130**

Waalidku way ka war hayn karaan dhacdooyinka HISD hadday ay akhriyaan wargeyska degmadoo dhan gaadha ee *HISD Today.*Wargeyskan laba-biloodlaha ee ku soo baxa labadda-af loona diroo guryaha arday walba lagana heli karo boga internetka wuxuu xooga saara wararka dugsiga iyo kuwad dhistariga ee xiiso gelinaya ardayda, waalidiinta, iyo bulsho waynta. Waxaa ku qoran guulaha ardayda iyo shaqaaluhu gaadhaan iyo wararka ku sahabsan barnaamijyada cusub. Waxaa isna soo baxa warside ku soo baxa afka fiitnaamiiska oo la yidhaa *Thong Tin.*

Si aad u hesho labada jariidadood midkood la soo xidhiidh dugsiga ama booqo bogga internet-ka ee www.houstonisd.org. Kadibna guji News@HISD.

# GUDOOMAY

# BUUGA WAALIDIINTA EE DADKA BARTA LUUQADA INGIRIISKA

**Waxaan halkan ku cadaynayaa inaan helay buuga waalidiinta ee dadka barta luuqada Ingiriiska.**

| | |
|---|---|
| ______________________________ | ______________________ |
| **Magaca Waalidka/Masulka (Qor)** | **Saxeexa waalidka/masuulka** |
| ______________________________ | ______________________ |
| **Magaca Ardayga** | Dugsiga **Ardayga** |

______________________

**Taariikh**

FADLAN XAASHIDAN U SOO CELI MACALINKA ILMAHAAGA.